



**SOMALI NATIONAL
BUREAU OF STATISTICS**
Federal Republic of Somalia

TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA SOOMALIYA



JUUN 2026

Tusaha Sicirka Badeecadaha, Soomaaliya

Hordhac

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waa tilmaame dhaqaale oo muhiim ah oo hal beeg u ah isbeddelka guud ee isugeynta boqoleyda ee sicirka tafaariiqda ee badeecadaha iyo adeegyada ay iibsadaan qoysaska Soomaaliyeed. Waxay u adeegtaa sida qiyaasta asaasiga ah ee sicir bararka, ayada oo awood u siineysa siyaasad-dejiyayaasha, ganacsiyada, iyo cilmi-baarayaasha si ay u qiimeeyaan isbeddellada ascaarta una sameeyaan go'aamo dhaqaale oo maan-gal ah. Tan iyo Janaayo 2025, TSB-da Soomaaliya ayaa la sii daayay iyadoo la tixgelinayo hal beegyo cusub oo laga soo qaatay SAHANKA MIISAANIYADDA QOYSKA SOOMAALIYEED 2022 (SIHBS), iyadoo lagu lifaaqaayo kalasaarida cusub ee kharashka qoyska (COICOP 2018), warbixintaan waxey ka turjumeysaa dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah. qoraal habraac ah ayaa laga helindoonaa Bogga Internet-ka ee SNBS.

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxaa lagu qeexay sidan:

Cabbirka isbeddelka celceliska miisaanka leh ee qiimaha tafaariiqda ay macaamiishu ku bixiyeen agabka iyo adeegyada mudo cayiman. meelaha ugu muhimsan ee TSB-da loo adeegsan karo waxaa ka mid ah:

- Cabirka Sicir-bararka: Sicir-bararka sannadlaha ah (YoY) wuxuu isbarbar dhigayaa qiimaha hadda jira sanadkaan iyo qiimaha isla xiligii sannadkii hore, isagoo u adeegaya sida qalab loogu talagalay siyaasadda lacagta iyo maaliyadda.
- Go'aan-qaadasho Dhaqaale: Waxaa isticmaala hay'adaha dawladda, ganacsiyada, iyo hay'adaha caalamiga ah si loogu hagaajiyo mushaharka, qandaraasyada, iyo ka faa'iidooyinka bulshada.
- Falanqeynta Dhaqaalaha Guud: Waxay taageertaa qiimeynta awoodda wax iibsiga, hagaajinta qiimaha kharashka-nololeed, iyo xasilloonida dhaqaalaha.

Habka Uruurinta Qiimaha:

- Sida joogtada ah: Waxa xogta la aruuriyaa toddobaadka koobad iyo kan saddexaad ee bil kasta.
- Deeganada laga soo uruuriyo: Muqdisho (Caasimadda), Dhammaan Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (FMS).
- Ash'yaada ama badeecadaha: Tiradoodu waa 537 shey, oo laga sooxulay Sahanka SIHBS 2022, waxaana loo kala soocay si waafaqsan Kala-soocidda Isticmaalka Shaqsigaa ee (COICOP) 2018 marka loo eego 13-ka waaxood.

Istaatistikada Muhiimka ah

Sannadle (Juun 2026)

Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay tan iyo Juun 2026, TSB-da ayaa sare u kacay (+8.1%).

Qiima kororka ugu weyn ee laba iyo tobankii bilood ayaa ahaa:

- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+19.1%): Adeegyada Makhaayadaha (+22%).
- Adeegyada Waxbarashada (+14.0%): Waxbarashada Carruurta Yaryar iyo Dugsiga Hoose (+16.6%).
- Caafimaadka (+11.8%): Adeegyada bukaan socodka iyo Daawooyinka (17.1) iyo Adeegyada Caafimaadka (+8.8%), ayaa ah kuwa ugu badan ee kororka sameeyey
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+10.3%). Oo ay hogaamiyaan biyaha (+16.5%).
- Madadaalo, Isboorti iyo Dhaqan (+9.9%): waxaana u sareeya Alaabooyin Kale Madadaalo (+9.0%).

Ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah intii lagu jiray bishii Juun 2026. Kororka Heer dowlad-goboleed (Kan Ugu Sarreeya ilaa Kan Ugu Hooseeya)

- Galmudug: (+12.4%), Puntland: (+9.0%), Banaadir: (+8.6%), Jubbaland: (+8.3%), Hirshabeelle: (+6.9%), Koonfur Galbeed: (+6.2%).

Bille (Juun 2026)

Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) waxuu hoos u dhacay -2.7% Bisha Juun 2026.

Qiima kororka ugu badanaa ee bishan ayaa ahaa:

- Adeegyada Waxbarashada (+0.8%)
hoos u dhaca dheelitraya: Cuntada iyo Cabitaanka (-4.0%). Gaadiidka (-3.0%).
Kor u kaca heerka gobolka (kan ugu sarreeya ilaa ka ugu hooseeya):
- Galmudug (-4.8%), Hirshabele (-4.8%), Jubaland (-3.3%), Puntland (-2.7%), Banaadir (-1.9%), Koonfur Galbeed State (-1.6%).

Shaxda 1. TSB, Dhaqdhaqaaqyada Sanadlaha & Billaha ah ee Soomaaliyeed (%)



	Isbedalka Billaha ah (%)	Isbedalka Sanadlaha ah (%)
Juum-26	-2.7%	8.1%
Maajo-26	0.3%	8.4%
April-26	1.5%	8.1%

WARBIXINTA TSB-da EE SOOMAALIYEED – DHAMAAN QEYBAHA TSB-da**Jaantus 1. Heerka Sicir bararka marka loo eego TSB-da**

Isbadalka boqoleyda ee labo iyo toban bilood

Tixraca TSB

Mudada Tixraaca=2022

**Jaantuska 2. Qeyb ka qeybqaata (%) heerka sicir bararka (heerka qeybinta)**

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sannadlaha ah

Muddo 12 bilood ah ilaa Juun 2026, TSB-da ayaa sare u kacay 8.1%.

Qiimo kororka ugu weyn Laba iyo tobankii bilood ee la soo dhaafay ayaa ahaa:


- Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+19.1.4%): Adeegyada Makhaayadaha (+22%).
- Adeegyada Waxbarashada (+14.0%): Waxbarashada Carruurta Yaryar iyo Dugsiga Hoose (+16.6%).
- Caafimaadka (+11.8%): Adeegyada bukaan socodka (17.1%) iyo Daawooyinka iyo Adeegyada Caafimaadka (+8.8%), ayaa ahaa kuwa ugu badan ee korordhay.
- Guryaha, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (+10.3%). Biyaha (+16.5%) ayaa ugu sareeya.
- Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+9.9%): Adeegyada Madadaalada (+9.0%). Ayaa ku hogaaminaya.

Intii lagu jiray bishii Juun 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.

Shaxda 2. boqolkiiba isbeddelka heerka qaybta sannadlaha ah

Qaybinta	% - isbeddel sannadle ah		
	Abr-26	Maaj-26	Juun-26
WADARTA GUUD EE TSB-da	8.1%	8.4%	8.1%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	8.1%	8.1%	8.0%
02 - TUBAAKADDA	2.2%	4.2%	3.0%
03 - DHARKA IYO KABAHA	3.5%	7.8%	8.0%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKAL KALE	12.1%	9.7%	10.3%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	5.8%	5.2%	6.9%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	14.5%	13.3%	11.8%
07 - GAADIIDKA	6.0%	6.0%	4.9%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	4.4%	4.8%	2.6%
09 - HAWA BEDELESHO, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	12.7%	12.3%	9.9%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	12.2%	15.8%	14.0%
11 - MAQAAYADAH IYO ADEEGYADA HOYGA	12.2%	23.3%	19.1%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	2.9%	3.8%	3.9%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR...	4.8%	3.8%	3.2%

Jaantuska 3. Heerka qeybinta isbadelka boqoleyda ee sanadlaha ah



Warbixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

TSB-da ayaa bishan hoos u dhacday -2.7% intii lagu jiray bishii Juun 2026.

Kor u kaca qiimaha ugu badan bishaan waxuu ka yimid


- Adeegyada waxbarashada (+0.8%) oo ay hogaaminayaan kabaha (+5.4%) iyo shidaalka (+6.8).

Hoos u dhaca dheeliraya

- Gaadiidka (-3.0%).
- Cuntada iyo cabitaannada aan aalkolada laheyn (-4.0%).
- Cabitaannada aalkolada leh (-2.6%).
- Dharka iyo Kabaha (-2.0%).
- Guryeynta, Biyaha, Korontada, Gaaska iyo Shidaallada Kale (-1.8%).

Shaxda 3. heerka qaybta boqolkiiba isbeddelka bishii


Qaybinta	%beddel bishiiba		
	Abr-26	Maaj-26	Juunj-26
Wadarta guud ee CPI	1.5%	0.3%	-2.7%
01 - CUNTO IYO CABITAANNADA	0.8%	1.3%	-4.0%
02 - TUBAAKADDA	0.2%	1.5%	-2.6%
03 - DHARKA IYO KABAHA	-2.1%	2.7%	-2.0%
04 - GURYAHA, BIYAHA, KORONTADA, GAASKA IYO SHIDAALKA KALE	4.9%	-2.4%	-1.8%
05 - AGABKA, AGABKA GURIGA IYO DAYACTIRKA GURIGA EE JOOGTADA AH...	1.5%	-0.4%	-0.7%
06 - ADEEGA CAAFIMAADKA	2.1%	-0.7%	0.0%
07 - GAADIIDKA	4.4%	-2.1%	-3.0%
08 - MACLUUMAADKA IYO ISGAARINTA	-0.3%	0.3%	-1.3%
09 - HAWA BEDELESHO, CIYAARAHA IYO DHAQANKA	6.3%	0.4%	-0.7%
10 - ADEEGYADA WAXBARASHADA	-1.7%	0.6%	0.8%
11 - MAQAAYADAHA IYO ADEEGYADA HOYGA	-3.5%	1.5%	-0.6%
12 - CAYMISKA IYO ADEEGYADA MAALIYADA	-0.2%	1.1%	-1.5%
13 - DARYEELKA SHAKHSIGA AH, DARYEELKA BULSHADA IYO ADEEGYADA YAR YAR...	3.4%	0.0%	0.0%


Jaantuska 4. Heerka qeybinta isbedelka boqoleyda ee billaha ah

Tixraaca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 5. Tixraaca TBS-da ee heer dowlad goboleed

mudada Tixraaca = 2022

**Jaantuska 6. Boqolleyda ka-qeybqaadashada dhibcaha ee heerka sicir-bararka (ka-qeybqaadashada heer dowlad gobolled) (a**



Tixraca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Sanadlaha ah

Muddadii laba iyo tobanka bilood aheyd ilaa Juun 2026, isbeddellada sare u kac ayaa ka yimid:

- Galmudug (+12.4%):** Cuntada iyo Cabitaannada (+19.2%), Dharka iyo Kabaha (+16.1%), Adeegyada Waxbarashada (+14.0%), Caymiska iyo Adeegyada Maaliyadda (13.1%)
- Puntland (+9.0%):** Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+20.9%), Caafimaadka (+18.7%), Guryeynta (+8.9%), Gaadiidka (+4.7%).
- Banaadir (+8.6%):** Adeegyada Waxbarashada (+29.3%) Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+17.6%) Guryeynta (+17.4%)
- Jubbaland (+8.3%):** Dharka iyo Kabaha (+22.0%) Caafimaadka (12.0%)
- Hirshabeelle (+6.9%):** Daryeelka Shakhsiga, Ilaalinta Bulshada iyo Adeegyada Kale Gaadiidka (+30.9%) Qalabka Guriga, Sahayda iyo Dayactirka (+25.6%) Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (25.2%)
- Koonfur Galbeed (+6.2%):** Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+37.4%) Daryeelka Shakhsiga, Ilaalinta Bulshada iyo Adeegyada Kale (12.7%), Caafimaadka (+12.2%).


Intii lagu jiray bishii Juun 2026, ma jirin wax dhaqdhaqaaqyo taban ah.

Shaxda 4. Boqolkiiba isbeddelka heerka gobolka

Gobolka	% - isbeddel sannadle ah		
	Abr-26	Maaj-26	Juun-26
Wadarta guud ee TSB-da	8.1%	8.4%	8.1%
BANAADIR	7.5%	7.7%	8.6%
PUNTLAND	8.1%	9.2%	9.0%
GALMUDUG	9.9%	17.7%	12.4%
HIRSHABELLE	6.1%	6.3%	7.0%
JUBALAND	6.6%	7.7%	8.3%
KOONFUR-GALBEED	9.1%	6.1%	6.2%

(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 7.isbedelka boqoleyda ee Sanadlaha ah ee heer Dowlad Goboleed



(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

War bixin Kooban ee Dhaqdhaqaaqa Billaha ah

Intii lagu jiray bishii Maajo 2026, dhaqdhaqaaqyo hoos u dhac ah ayaa ka yimid:

- **Hirshabeelle (+2.3%):** Caafimaadka (+8.6%) iyo Madadaalada, Isboortiga iyo Dhaqanka (+4.2%).
- **Koonfur Galbeed (+2.3%):** Makhaayadaha iyo Adeegyada Hoyga (+16.1%) iyo Cuntada (+4.6%).
- **Banaadir (+0.9%):** Cabitaannada Khamriga ah (+5.1%) iyo Cuntada iyo Cabitaannada Aan Khamriga Ahayn (+4.0%).
- **Puntland (+0.3%):** Guryeynta (+5.8%) iyo Gaadiidka (+7.6%).
- **Jubbaland (-5.8%):** Hoos u dhac , balse waxaa jiray koror ku yimid: Dharka iyo Kabaha (+8.0%).
- **Galmudug (-0.3%):** Hoos u dhac , balse waxaa jiray koror ku yimid Cabitaannada kulul (+3.5%) .

Shaxda 5. Heer gobol ayaa isbeddelay boqolkiiba bishii

Gobolka	%beddel bishiiba		
	Abr-26	Maajo-26	Juun-26
Wadarta guud ee CPI	1.5%	0.3%	-2.7%
BANAADIR	2.3%	0.9%	-1.9%
PUNTLAND	1.3%	0.2%	-2.7%
GALMUDUG	1.2%	-0.3%	-4.8%
HIRSHABELLE	0.9%	2.3%	-4.7%
JUBALAND	5.1%	-5.8%	-3.3%
GOBOLKA KOONFUR-GALBEED	-1.0%	2.3%	-1.6%

(a) Tixraca Puntland waa la qiyaasay

Jaantuska 8. isbedelka boqoleyda ee billaha ee heer Dowlad Goboleed

